

Macluumaaad muhim ah oo ku saabsan PFAS



Waa maxay PFAS?

Maadada kiimikada ah ee Per-and polyfluoroalkyl substances (PFAS) waa koox kiimiko ah oo oogada sare laga mariyo alaabada si ay ugu adkeystaan kuleylka, saliidda, xoqitaanka, garaasada, iyo biyaha. Waxyabaha gaarka ah ee kiimikada ah ee ay ka kooban yihiin darteed ayaa keenay in loo isticmaalo siyaabo kala duwan. PFAS waxaa laga helaa dharka, alaabada guryaha, xabagta ama koolada, waxyabaha cuntada lagu rido, alaabada cuntada lagu karsado ee aysan saliiddu ku dhagin, iyo xumbada dabka lagu damiyo.

Waxyaboo badan oo laga sameeyo PFAS waa kuwo dareen leh waayo:

- Kuma milmaan degaanka,
- waxa ay ku nagaadaan ciidda oo ay soo raacaan biyaha la caboo.
- oo ay ku soo ururaan (biocumulate) kaluunka iyo xayawaanka duur joogta ah.

Labada daraasadood ee ugu badan ee noocyada PFAS perfluorooctane sulfonic acid (PFOS) iyo perfluorooctanoic acid (PFOA).

PFOS waxaa laga sameeyaa Scotchgard iyo alaaboo kale oo xagatinta u adkeysta. PFOA waxaa loo isticmaali jiray alaabada cuntada lagu karsado sida Teflon. Mareykanka, PFOS iyo PFOA waxaa la joojiyey sanadadii 2000, hase yeeshie, weli waxaa lagu isticmaalaa dunida waxaana alaabada laga sameeyo loo soo dhoofiyaa Mareykanka sida rooggaa dhulka, dharka, iyo alaabada cuntada lagu qaado.

Waa Maxay Heerka PFAS Ee Biyaha La Cabo Ee Minneapolis

Bishii Siteembar 2023 Adeegga Nadiifinta & Qeybinta Biyaha (WTDS) waxa ay biyaha la caboo ka baareen 26 nooc PFAS ah. 4 ka mid ah oo heer aad u hooseeya ah ayaa laga helay. Kuwa laga helay waxa ay ahaayeen:

- PFBA ee 8.8 qeybood halkii tirilyanba (ppt)
- PFPeA ee 2.3 ppt
- PFHxA at 2.1 ppt
- PFBS ee 2.5 ppt

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota waxa ay soo saartay tilmaamo qeexaya heerka PFBA ee 7000 ppt, PFHxA waa 200 ppt iyo PFBS ee 100 ppt. Xilligaan ma jiro tiro la ogayahay oo caafimaadka wax u dhimeysa ee PFPeA.

Heerka WTDS waa mid aad uga hooseeya kan ay soo saartay MDH. Iyada oo lagu saleynayo macluumaaadkaas, MDH waxa ay cadeysay in biyaheenu yihiin kuwo amaan ah.

Waa Maxay Khatarta?

Sida laga soo xigtay EPA iyo MDH, cabitaanka heerka PFAS ee ku jira biyaha la cabو ma aha mid khatar ah.

Waxa ay daraasaduhu mujiyeen in PFAS ay ku ururi karto kuna nagaan karto jirka muddo aad u dheer iyada oo jirka ku badatana ay keeni karto dhibaato caafimaad oo khatar ah. Sida laga soo xigtay Xarunta Ka Hortagga iyo Xakameynat Cudurada (CDC), PFAS waxa ay yareysaa bacrimayayaasha, keentaa isbedelka hormoonada jirka, kordhisaa duxda dhiigga ku jira (cholesterol), difaaca jirka oo yaraada, Khatartu cudurka kansarka oo kordha, koritaanka iyo barashada ilmaha oo dib u dhacda. Mudada uu socday sahan heer qaran , PFOA iyo PFOS waxaa laga helay dhamaan dadka baaritaanka lagu sameeyey. Hase yeeshi, CDC waxa ay ogaatay in heerka dhiigga ee PFOA iyo PFOS ee ku nool Mareykanka uu si tartiib tartiib ah u kordhayo tan iyo 1999 (CDC 2019)

Sidaa ayaa qofku ku soo gaari karaa PFAS?

Biyaha la cabو ee laga helo heer aad u hooseeya ee PFAS looma arko in ay tahay mid keeneysa khatar caafimaad. Dadka waxa ay PFAS ka soo gaartaa cuntada ay cunaan ama cabitaanka ay caban oo lagu diyaariyo biyo wasakheysan oo horay PFAS u gaartay ama waxyabaha kale ee la isticmaalo. Sida laga soo xigtay EPA iyo MDH, cabitaanka heerka PFAS ee ku jira biyaha la cabو ma aha mid khatar ah.

Minneapolis maxay ka qabaneysaa PFAS?

Waaxda Nadifinta Biyaha (WTDS) waxa ay la socotay heerka PFAS tan iyo 2015. Baaritaanadii hore ee la sameeyey PFAs lagama helin biyaheena. Hababka daraasadda loo sameeyo oo aad horumar looga gaaray darteed, waxaa la ogaan karaa tirada ugu yar ee PFAS.

Sanadkii 2023, waxa aanu bilownay in aan la socono heerka 29 nooc PFSA oo qeyb ka ah kuwa aanay sharciga ka soo saarin EPA ee Sumowga Biyaha ee Sharciga 5. Natijadan waxa ay nagu dhalisay in aan joogteyno baaritaanka biyaha ee PFAS ee mustaqbalka. Wawaani natijada baaritaanada ee sanadka 2024 soo bandhigi doonaa maka ay naga soo gaaraan MDH.

Rev. 01/2024